

## Oggolaanshiiyaha Waalidka ee Ka Qayb Qaadashada Cilmi Baadhista

Waxaa lagaa dalbaday in ilmahaagu ka qayb galo daraasada cilmi baadhista. Inta aanad ogolaan, waa in lagu siiyaa macluumaad kooban oo ku saabsan daraasada cilmi baadhista. Soo koobiddani waxay ka koobnaanaysaa macluumaadka ugu muhiimsan ee kaa caawinaya inaad fahanto sababaha ay inaad ama inaanad u rabin in ilmahaagu ku biiro daraasaddan.

Inta aanad ogolaan, baadhuhu waa inuu kuu sheegaa:

- (i) Ujeeddada, habka, iyo inta ay qaadanayso cilmi baadhistu;
- (ii) Haddii ay jiraan nidaamyada u baahan in la hubiyo;
- (iii) Khatar kasta oo la filan karo, raaxo la'aan iyo faa'idooyinka cilmi baadhista;
- (iv) Haddii ay jiraan nidaamyada faa'ido leh oo kale oo la raaci karo ama gunooyin kale; iyo
- (v) sida loo ilaalinayo sirta macluumaadka; iyo
- (iv) Cida lagala xidhiidhayo su'aalaha, cabashooyinka iyo dhaawacyadaba.

Haday munaasan tahay, baadhaha waa inuu kuu sheegaa:

- (i) Hadday jiraan magdhaw ama daawayn caafimaad haddii uu dhaawac ku soo gaadho;
- (i) Suurtagalnimada khataraha aan la arkayn;
- (iii) Xaaladaha uu muraaqibku hakin karo ka qayb qaadashadada ilmahaaga;
- (iv) wixii kharashaad dheeraad ee laguugu darayo adiga ama wiilkaaga;
- (v) waxa dhacaya haddii aad ilmahaaga ka joojiso inuu ka qayb qaato;
- (vi) Marka ay tahay in lagu sheegayo waxyaabaha cusub ee la helay kuwaas oo saamayn kara rabitaanka ka qayb qaadashada ilmahaaga;
- (vii) Inta qof ee ku jiri doona cilmi baadhista; iyo
- (viii) Sida laagaga baahan yahay inaad u ogolaato macluumaadkaaga caafimaadka ilmahaaga ee daraasadda.

Ka qayb qaadashada ilmahaaga cilmi baadhista waa mutadawacnimo, sidoo kalena ilmahaaga laguma ciqaabayso ama ku waayayo wax faa'ido ah haddii aad u diido inuu ka qayb qaato ama aad u go'aamiso inuu joojiyo. Inaad saxaexdo dukumentigan waxay ka dhigan tahay, oo ay ku jirto macluumaadka sare, in afka lagaaga sharraxay, iyo inaad ikhtiyaarkaas aad ilmahaaga ugu ogolaatay inuu ka qayb qaato. Haddii aad ogolaato in ilmahaagu ka qayb qaato, waa in lagu siiyaa koobi saxaexan oo dukumentigan ah iyo soo koobid qoran oo cilmi baadhista ah oo Ingiriisi ku qoran.

### Su'aalaha?

Haddaad hayso su'aalo, cabashooyin, dhaawacyo ama walaacyo ku saabsan daraasaddan, waxaad la xidhiidhi kartaa baadhaha adigoo isticmaalaya nambarka tilifoonka ee ku qoran koobidda daraasadda. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan xuuqda ilmahaaga ka qayb-gale ahaan, ama haddii aad hayso su'aalo, cabashooyin ama walaacyo oo aad u malaynayso inaad kala hadli karto baadhaha, fadlan la soo xidhiidh Gudida Dib U eegista Qawaaniinta adigoo isticmaalaya nambarka tilifoonka ama ciwaanka iimaylka ku qoran koobidda daraasaddan.

\_\_\_\_\_  
Magaca ilmaha

\_\_\_\_\_  
Magaca Waaldika/Ilaaliyaha

\_\_\_\_\_  
Saxiixa Waaldika Ilaaliyaha

\_\_\_\_\_  
Taariikhda

\_\_\_\_\_  
Xidhiidhka ilmaha ee waalidka/masuulka

Waxaan xaqiijinayaa inaan u joogay turjumaan ahaan intii lagu guda jiray habka heshiiska ee daraasadda cilmi baadhistaan. Waxaan xaqiijinayaa inaan ahay khabiir leh xirfadaha lagama maarmaanka ah si aan wax ugu kala turjumo luuqadda waalidka/masuulka ka soo qayb galayaasha iyo Ingiriisida. Inaad foomkan saxeexo, Waxaan xaqiijinayaa inaan soo bandhigay adeeg turjumaan oo dhammaystiran oo aan isku bedelayo cilmi baadhaha helaya ogolaanshiyaha iyo waalidka/masuulka ka qayb galaha, sida ugu wanaagsan ee awoodayda ah.

\_\_\_\_\_  
Magaca Turjumaanka

\_\_\_\_\_  
Saxeexa Turjumaanka

\_\_\_\_\_  
Taariikhda

**MUHIIM:** Saxeexan safka ah ee hoose ee waalidka 2aad, ma aha in lagu daro illaa ay codsadaan IRB.

\_\_\_\_\_  
Magaca Waaldika/Ilaaliyaha  
2aad

\_\_\_\_\_  
Saxiixa Waaldika/Ilaaliyaha 2aad

\_\_\_\_\_  
Taariikhda

\_\_\_\_\_  
Xidhiidhka ilmaha ee waalidka/masuulka 2aad

Oglaanshiyaha lagama heli karo waalid/masuul-ka labaad sababta oo ah (fadlan hubi xaaladahan keebaa ku khuseeya, 45 CFR 46.408):

- Waalidka/Masuulka oo dhintay.

*Must be used with an English version of the full consent document approved by the IRB*

- Waalidka/Masuulka oo aan la garanayn.
- Waalidka/Masuulka oo waalan.
- Waalid/masuulka oo aan sabab ahaan la heli karayn.
- Kaliya waalid kaliya ayaa sharci ahaan xaq u leh daryeelidda iyo ilaalinta ilmaha.